

# Duruusta tallaabooyinkii Sheekh Madar ee aasaaska Hargeisa

Qormo taxane ah oo salaasa kasta ku soo baxda wargeyska Haatuf

## Qormadii 2aad.

### Qalinkii: Cabdirisaaq Caqli

Curinta qoraalkan taxanaha ah ee ku saabsan tallaabooyinkii Sheikh Madar ee aasaaska Hargeisa waxaan u cuskaday:

- Qoraalada sahamiyaayaashii Ingiriiska ee ku cagabixin jiray Somaliland sanadihii 1840-1920.
- Qoraalada saraakiil Ingiriis ah oo ugaadhsan jirtay duurjoogta Somaliland sanadihii 1885-1910.
- Qoraalada hawlwadeenadii Ingiriiska ee ka talin jiray Maxmiyada Somaliland.
- Qoraallo ku saabsan dalka Somaliland ee xilliyadii gumeysiga.
- Qoraallo laga qoray dariiqooyinka Suufiga ah ee ka jiray Somaliland.
- Qasiidooyinkii iyo manaqibyadii ay Sheekh Madar u tiriyeen culimo Soomaaliyeed.
- Gabayo ay abwaanno Soomaaliyeed u tiriyeen Sheekh Madar.
- Waraysi aan ka ururiyay dadka nool ee lagu tuhmayo inay xog-ogaal u yihiin taariikh nololeedkii Sheekh Madar.

Haddii aan dib ugu laabto nuxurka qoraalkayga, waxaa ugu horreyn lagama maarmaan ah in aan si kooban u yara dabagalno habkii uu u soo barbaaray, iyo taariikh nololeedkii Sheekh Madar ka hor intaanu Hargeysa soo degin, si ay innoogu iftiinto shakhsiyadda Sheekh Madar siday ahayd markii uu yimid Hargeysa.

Taariikhda afafka layskugu gudbiyo ee laga soo xigtay dadka lagu tuhmayo inay xogogaal u yihiin taariikh nololeedkii Sheekh Madar waxay isku waafaqsanyihiin in uu ku dhashay goobta Hadayta oo u dhexaysa Lughaya iyo Ceelsheekh. Geed dhamas ah oo aad u weyn kuna yaalla xeebta Hadayta, una jira badda ilaa laba boqol oo tallaabo, ayaa lagu tilmaamaa inuu yahay geedkii uu ku hoos dhashay Sheekh Madar. Geedkaasi oo aad u dheeraday meel fog oo tobannaan kiilomitir ahna laga soo arko marka Hadayta lagu soo soocdo. Gabay uu tiriya abwaankii Cabdi Khaliif Indhoole wuxuu ku tilmaamay tix gabay ah isagoo Sheekh Madar u tirinaya gabay “*Makaankuu ku dhashay, Hadaytaa ka magoolay oo Almis muuqa ka dheer*”. Qoraalada taariikhiga ee ay qoreen sahamiyaashii Ingiriiska ahaa ee Somaliland ku cagabixiyay dabayaaqadii qarnigii 19aad, waxay inoo muujinayaan in reerka uu ka dhashay Sheekh Madar ay degi jireen goobtaasi iyo agagaarkeeda xilliga jiilaalka oo ah marka gubanka ugu fiicanyahay. Sannadkii uu dhashayna wuxuu ku beegan yahay 1826 marka qoraalada Sheekh Madar da’diisa xusaya laga xisaabiyo.

Sheekh Madar wuxuu ka dhashay qoys reer guuraa ah oo dhaqda geel, adhi, riyo iyo fardo. Caruurnimadiisiina wuxuu u soo kacaamay habka ay caruurta Somaalida ee reer guuraagu u korto. Sida la ogsoonyahay bii'adda reer guuraagu waxay leedahay astaamo u gaara oo kobciya korriinka caruurta gaar ahaan dhinaca jidhka iyo ka ruuxiga. Reerka uu ka dhashay waxay xilliyadii uu kacaamay u kala guurguuri jireen Gubanka iyo Oogada, mararka roobku yaaraadana waxay u sii gudbi jireen ilaa hawdka shishe.

Gubanku waa dhulka xeebta ku dhow iyo buuraleyda u sii foorarta dhinaca xeebta. Waxayna badanaa reeruhu u soo guuri jireen gubanka xilliga jiilaalka. Bisha Oktoobar ilaa bisha March ayuu roobku ka da'aa gubanka. Inkastoo guud ahaan uu roobka gubanka ka da'aa uu yaryahay, hadana waa meel biyuhu ay ku farabadan yihiin, oo aanay biyo yaraani ka jirin. Waayo roobabka xooggan ee buuraleyda hela ayaa ku soo shubma dooxyada gubanka.

Oogaduna waa buuraleyda koonfur u soo rogan iyo buuraleyda siman ee gaadhsiisan xuduuda Somaliland la leedahay Etoobiya. Dhulkaasina waxaa hela roobab badan, hase ahaatee way ka biyo yartahay gubanka. Waxayse oogadu lahaan jirtay ceelal badan oo dooxyada agtooda laga qodo oo beeshii ceelkaasi qodday oo keliyi leedahay biyihiisa. Meelaha qaarkoodna waxaa loo baahan jiray in ceelasha aad loo dheereeyo si biyo looga gaadho. Taasoo ceelashaasi aad loo dheereeyay loo yaqaannay ceel wadaameed, ceelasha gaabanna ee aan aad u dheerayna loo yaqaan ceel dhoobeed.

Hawdka oo ah dhulka koonfur ka sii xiga oogada kuna yaalla dhulka manta ka tirsan Etoobiya, waa dhul siman oo u badan carro cas, waxaana aad ugu yaraa ceelasha laga qodi karo ee biyo laga gaadhi karo. Waxaa se dhowaan laga sameeyay berkado iyo waro.

Sheekh Madar wuxuu fursad u helay inuu u kala guur guuro saddexdaasi nooc ee dhulka Somaliland ka koobanyahay, iyo inuu barto astaamaha u gaarka ah ee mid waliba leeyahay. Sida la ogsoonyahay, geediyaasha iyo hayaamada dheeriba waxay caruurta u kobcin jireen dhismaha jidhka, waxayna kordhin jireen adkaysiga uu qofku u yeelan karo dhibaatooyinka noloshiisa ka hor iman kara. Taaso uu noqon jiray qof karti iyo adkaysi leh.

Haddii aan gudagalno habka ay waxbarashadiisu ahayd, waxaa inoo muuqan kara in waxbarashada caruurta reer guuraaga ahi lahayd astaamo u gaar ah. Waxbarashada caruurta kumay salaysnayn hab dugsiyo leh, duruuus joogto ah la akhriyo, buugag wax lagu qoro, lana akhriyo kutub. Waxay ahayd hab uu ilmuhu si joogto ah oo korriinkiisa la socota uu u baranayo bii'adda, dhaqanka bulshadiisa, iyo hawlaha lagama maarmaanka u ah. Caruurta iyagoo yar yar ayey baran jireen magacyada dhirta bii'adda ay ku kacaameen oo idil, iyo mid walba faaiidada iyo dhibaataada uu leeyahay. Waxay baran jireen aqoonta la xidhiidha xoolaha tiyoo ay wiilashu ku bilaabi jireen raacitaanka maqasha, ka dibna nirgaha, ka dibna geela, tiyoo ay tartiib tartiib u baran jireen baahida, dabciga, astaamaha xanuunada iyo daawooyinkoodaba. Waxay baran jireen magacyada dhulka ay degaan oo idil iyo meel walba inta ay u jirto meesha kale. Waxay baran jireen goob walba dhirta ay leedahay iyo kuwa ay caanka ku tahay. Waxay baran jireen

abtirsiinta reerkooda, reeraha ay deriska yihiin iyo kuwa ay xididka yihiinba. Waxay baran jireen xidigaha, magacyadooda, goorta ay mid waliba soo baxdo ama ay dhacdo, socodka iyo isbedelka dabaylaha xilliyada kala duwan, xilliyada roobka iyo goobaha uu ka da'o xilliyada kala duwan.

Waxay caruurta reer guuraaga ahi qaan gaadhi jirtay tiyoo ay leeyihiin aqoon ku filan, kuna salaysan bii'adda ay ku noolyihiin, shaqooyinkooda lagama maarmaanka ahna wax ka tari karta. Inkastoo laga yaabo in ilmahaasi qaangaadhay aanu wax akhriyi karin, waxna qori karin, hadana wuxuu mudadii uu soo jiray bartay cilmiga xoolo dhaqista (Veterinary & animal husbandry). Cilmiga aqoonta dhirta (Botany), Cilmiga aqoonta dhulka, dabaylaha, iyo roobabka ( Geography), Cilmiga aqoonta afka, maahmaahaha iyo gabayada (Language & Literature), Cilmiga aqoonta abtirsiga (geneology) cilmiga qabdhismeedka bulshada somalida (Anthropology), Cilmiga aqoonta dhaqanka bulshadiisa (Sociology), Cilmiga adkaysiga iyo socodka ( Physical fitness), iyo cilmiyo kale oo badan.

Reeraha qaarkood ayaa laga dhex heli jiray macalin caruurta reeraha ay wada guurayaan bara Quraanka iyo afka carabiga, akhris iyo qoraal ahaanba. Taasoo ah dugsi guuraya. Caruurtuna waxay akhriska iyo qoritaanka quraanka ku baran jirtay loox ay u qaadan karaan kolba halka ay doonaan, marka uu deriskii hore dhammaadana inta laga masaxo khadka ayaa mid cusub lagu qori jiray. Wiilka fursadaasi helaana wuxuu caruurta kale dheeraan jiray aqoonta diinta iyo afka carabigaba. Waxaana inoo muuqda in uu sheikh Madar ka mid ahaa kuwa yaraantoodii fursadaasi helay. Wuxuuna isagoo yar bartay Quraanka iyo afka carabiga. Waana mid la ogsoonyahay in barashada iyo xafidaada quraanku ay kobciso maskaxda ilmaha yaraan ku xafida quraanka. Sidoo kale akhriska joogtada ah ee quraanku wuxuu xoojiyaa ruuxa qofka.

Wuxuu ilmuhu qaan gaadhi jiray tiyoo uu ogaaday aqoonta uu ku wanaagsanyahay. Si gaar ahna wuu u sii gudageli jiray. Taasoo ah in uu midi isku taxallujin jiray gabayda, mid kale dhaqista iyo daaweynta xoolaha, mid kale dhaqanka, mid kale abtirsiinta, mid kale diinta iwm. Sheekh Madar wuxuu qaangaadhay iyadoo u dhismay jidhkiisu oo geediyo dhaadheer iyo hayaamo fogfog soo arkay, maskaxdiisana ay kobcisay barashadii kala duwanayd ee uu ku soo barbaaray ee aynnu kor ku soo aragnay, ooy u dheertahay barasho af kale oo carabiga ah, ruuxiisana uu sii kobciyay barashadii Quraanka ee uu yaraantiisii fursadda u helay. Waxay taariikhda afka layskugu gudbiyaa inoo sheegaysaa in sheikh Madar isagoo yar uu aabihii ogaaday in uu diinta iyo afka carabiga ah ku wanaagsan yahay. Caruurta qaangaadha ee ku wanaagsan afka carabiga iyo diinta waxaa loo diri jiray Magaalada Harar oo ahayd xarunta ugu weyn ee diinta laga barto si ay u sii korodhsadaan aqoontooda diineed. Taasi se waxay u suurto gelaysay ciddii heli karta xidhiidh u sahlaya sii korodhsiga diineed. Waxaa isweydiin mudan ma jiray xidhiidh uu Shekh Madar aabihii Axmed Shirwac la lahaa Harar oo suurtoogelin kara inuu wiilkiisa halkaa u diro si uu u sii khorodhsado aqoontiisa diineed?. Jawaabta su'aashaasi waxaynu ka heli qormada danbe ee taxanahan.

**La socio Salaasada danbe.**